1. Suaallo iyo Jawaabo ku saabsan Codsiga marka la soo gaabiyo loo qoro ARY oo macnihiisu yahay codsiga gaarka u ah ilmaha noloshiisu halista ku jirto:

Maxaan ugu baahnahay inaan ka dalbado maxkamada codsiga loo yaqaan ARY?

Waxaad u dalban codsigaan si aad uga hesho maxkamada caruurta caawimaad ku saabsan sidii si hagaagsan loogu maamuli lahaa daryeelka, haysmada iyo gacan ku haynta ilmaha. Sidoo kale, waxaad u dalban sidii lagaaga caawin lahaa in xal loo helo is afgarasho waa dhex mara qoyska, kaasoo la horkeeno maxkamada ka dib, markii siyaalo kale oo aan maxkamad ahayn oo is afgarasho waagaas lagu dhameeyo la isku dayay ka bacdi, intaan maxkamadu arrinta soo dhex galin ka hor.

Ilmahaygu ma u qalmaa codsigaan?

Waxaa sharcigu u qeexaa in ilmo noloshiisu halis ku jirto uu yahay ilmaha da'diisu ka yartahay 18 sanno oo muujiya ugu yaraan mid ka mid ah sadexdaan waxyaalood ee soo socda:

2. Ilmaha ugu yaraan ka maqan guriga 72 saacadood oo isku xigta isagoon ka amar qaadan waalidka; AMA
3. Ilmo faraha waalidka ka baxay oo dabeecadiisa ama dabeecadeedu halis galinayso caafimaadka, nabadgalyada ama samaanta ilmahaas ama qof kale; AMA
4. Ilmaha qaba dhibaato la xariirta isticmaal maandooriye oo aan markaas loo haysan danbi markaas taagan oo ku saabsan isticmaal maandooriye ama eedeeyn dacwad dambigaas ah oo lagu soo oogay oo markaas taagan.

Yaa codsigaan dalban kara?

Ilmaha waalidkiisa kaliya ayaa dalban kara codsiga ARY. Waalid waxaa la yiraahdaa qofka xaq sharciyeed u leh inuu masuul ka noqdo ilmahaas, waxaa qofkaas noqon karaa qofkii masuuliyada haysmada ama ilaalinta ilmahaas ay saaran tahay.

Maxaan u baahnahay si aan codsigaan hawlgalkiisa u bilaabo?

La xariir Xafiiska kuu dhow ee qaabilsan Adeegyada la xariira Heshiisiinta Qoyska ee loo yaqaan marka la soo gaabiyo (FRS). Waxaa xafiiskaas ku dhexyaalaa Hay'ada Adeegyyada Bulshada iyo caafimaadka ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan DSHS. Ka dalbo xafiiskaas balan xaaladaada loogu furayo fayl oo lagu qiimaynayo. Kulanka balantaas markuu dhamaado ka bacdi, waxaaa masuulkii dacwadaada gacanta ku hayay kuu diyaarinayaa Warbixin ku saabsan qiimayn lagu sameeyey qoyska. Warbixintaas koobi ka dalbo oo ku lifaaq codsigaaga. Intaadan codsigaaga diiwaan

gelin ka hor. Maxkamadu waa in ay haysataa koobiga qiimayta qoyska ay ku soo samaysay hay'adda FRS intaan codsiga hawshiisa la gelin ka hor.

Adeegyada Heshiisiinta Qoyska (FRS)
1-800-609-8764 Days, 8 Subaxnimo - 4:30 Galabnimo
1-800-562-5624 Waqtiyada Danbe, 4:30 Galabnimo. - 8 Subaxnimo

Halkee ka diiwaan geliyaa codsiga?

Arjiyada waa in laga diiwaan geliyaa xafiiska kalkaaliyaha maxkamada caruurta ee cinwaankeedu yahay 1211 E.Alder, Seattle) ama Xarunta Gobolka ee Cadaalada ee cinwaankeedu yahay 401 4th Ave N, Kent). Arjiyadaas waxaa laga diiwaan gelink karaa labadaas meelood midkood. Laakiin dhagaysiga dacwadaa wuxuu ka dhacaya maxkamada u dhow nambarka soohdinta xaafada (Zip Code) ee waalidku dagan yahay. Guud ahaan, dacwadaha u gaarka ah degmooyinka Seattle, Dhinaca Bari, iyo Waqooyiga degmada kiin kaawnti (King County), waxaa dhagaysigoodu ka dhacayaa Seattle, kuwa la xariira koonfurta degmada Kiin Kaawnti (King County)na waxaa dhagaysigoodu ka dhacayaa magaalada Kent.

Ma wax kharash ah baa jira oo codsigaani ku kacayo?

Wax kharash ah ku bixi mayo in la diiwaan galiyo codsigaan ama in la sameeyo qaymayn qoyska uu ku sameeyo Xafiiska Heshiisiinta Qoyska. Waalidku waa in uu masuul ka noqdaa in uu bixiyo kharashka la xariira qorshe ay maxkamadu amartay sida(la talin,Qiimayn iyo dawayn la xariirta khamri ama maandooriye,ama qiimayno lagu sameeyo caafimaadka caqliga. iyo wixii la mid ah. **Waxaa jiri karaya kharash xambaarsan qareenka loo xirl saaray in uu difaaco cunugaaga; waxaad kala xiriiri kartaa maclumaad dheraad ah xafiiska difaaca dadweynaha 206 296 7662.**

Yaan la xariiraa haddaan u baahdo in la iga caawiyo hawlgalka codsigaan?

Wixii warbaxin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaan gelinta codsigaan, fadlan la xariir;

Kalkaaliyaha barnaamijyada u gaarka ah ilmaha noloshiisu halista ku jirto. Teleefoonka 206-205-9732.

Su,aalaha la xariira codsiyo hada taagan oo mar hore la diiwaan geliyay iyo meeshay marayaan, Fadlan la xariir maamule dacwo oo jooga meeshaad u timaado dhagaysi maxkamadeedka la xariira codsigaan.

Xarunta Gobolka ee Cadaalada (Kent)

Amy Andree (amy.andree@kingcounty.gov), (206) 205-2578

Maxkamada Caruurta ee Siyaatal(Seattle)

Karen Chapman, karen.chapman@kingcounty.gove, 206-205-9716.

Sidee baan ula socodsiiyaa ilmaha balanta maxkamada?

Si si haboon qofka dacwada loo haysto loola socodsiiyo,Waa in qof da,adiisu ka wayn tahay 18 sanno, oo aan waalidka ilmaha ahayn, dacwadaana aan ka mid ahayn uu u dhiibaa qofka dacwadaan loo haysto koobiyaasha warqadaha maxkamada la soo hor dhigayo.
Marka adeeguhu u gudbiyo warqadaha maxkamada qofka kale ee dacwadu ka soo horjeedo ka bacdi, waa in adeegahaasi uu buuxiyaa warqad cadaynaysa in loo dhiibay warqdaha maxkamada qofkaas. Warqadaas waxuu u baahan yahay in qofka warqadahaas qofkaas u dhiibay in uu yiraahdo odhaah uu ku dhaaranayo(Asago been ka dhaaranaya, inuu u dhiibay qofkaas dacwada ka midka ah warqadihii maxkamada. Qofkaas dhiibay warqadaha waa in uu ku qoraa cadayntaas inuu dhiibay warqadaha ku saabsan taariikhda uu dhiibay isla markaasna waa in uu hoos ka saxiixaa inuu siiyay qofkaas warqadaha. Taas ka bacdi waa in uu warqadaas cadaynta ah u soo celiyaa qofkii ka dalbaday inuu adeegaas u sameeyo. Warqadaas waa **cadayn muujinaysa in la siiyay qofkaas warqdahaas** waana khasab in cadayntaas la keeno balanta dhagaysiga maxkamada.

Maadaama ay arrintaani tahay mid maxkamad la xariirta, ma waxaa ku lug leh qareeno ama looyaro.?

Ilmaha waxaa maxkamadu u qabanaysaa isla markaba qareen markasta oo uu dhagaysi maxkamadeed leeyahay.
Midda ku saabsan codsiga ARY, waalidku xaq uma laha qareen maxkamadu u qabato si kastoo ay u jirto baahi dhaqaale. Waalidku mar walba xaq buu u leeyahay in uu qareen asaga/ayada kharashkiisa iska bixiyo/bixiso oou gaar ah qabsado/ qabsato.

Turjubaano ma joogaan hadaan qofku ku hadlin af ingiriis?

Hadii qof u baahan yahay turjubaan dhagaysiga maxkamada uga turjuma, waa inuu u sheegaa codsigaas shaqaalaha jooga xafiiska kalkaaliyaha maxkamada markay dacwadaas diiwaan galinayaan. Maxkamada sarre ee Kiin Kaawnti (King County) ayaa bixinaysa adeega turjubaanka oo dhan.

Waxyaabo maxay ah oo kale bay maxkamadu amraysaa?

Hadii maxkamadu go,aan ku gaarto in uu ilmaha yari halis ku jiro, maxkamadu amar bay soo rogi kartaa ku khasbaya

Ilmaha:

- Inuu ilmahaas iskuul tago oo uusan ka maqnaan cudurdaar la,aan, uusan ka dahin ama aadaab ahaan aan looga cayrin.
- In laga qiimeeyo khamri iyo maandooriye.
- In loo sameeyo qiimayn caqligiisa, asluubtiisa ama maskaxdiisa.
- Inuu saxiixo ogolaansho sii deyn warbixin asaga ku saabsan, si uu ugu ogolaado maxkamada, waalidka iyo looyarada inay natiijada helaan.
- In isagoon filayn kaadidiisa la baaro.
- Inuusan qaadan ama haysan wax maandooriye ama khamri ah.
- In waqti uu guriga joogo loo gooyo.
- Inuu isku qoro ama ka qayb qaato la talin asaga kaligiis lala talinayo ama asaga iyo qoyska lala talinayo.
- Inuu la deganaado waalidka
- Inuusan la xariirin……
- Inuusan u ogalaan dadka kale guriga waalidka isagoon fasax ka haysan
- Inuusan jir ahaan ama af ahaan wax ugu dhimin dad iyo hanta.

Waalidka

- Waalidka waxaa khasab ku noqonaysa in uu barnaamij iskuul ilmahaas ku qoro.
- Inuu balamihii lagu qiimayn lahaa ilmahaas u dhigo
- Inuu meel u dhajiyo qoraal qaanuunka guriga looga dhaqmayo iyo shaqooyinka guriga ee ilmahaas laga filayo.
- Inuu isku qoro ama tago la talin asaga u gaar ah ama asagiyo qoyska ama daruus ku saabsan waalidnimada.
- Inuusan af ahaan ama jir ahaan wax ugu dhimin dad ama hanti.

Maxaa ka mid ah waxyaabaha aanay maxkamadu amri Karin?

Gobolka Waashintoon waa gobol aan qofkoon doonayn meel la geyn Karin. Sidaas darteed maxkamadu ma amri karto in la dhigo ama lagu xareeyo meelo lagu daweeyo

Maxaa dhacaya hadii qof dacwadaan ka mid ah aanu fulin amarka maxkamada? Qofkii dacwada ka mid ah oo aan ka soo bixin wixii maxkamadu amartay wuxuu jabiyay ama yasay amarkii maxkamada . Jabinta la jabiyo ama la yaso amarka maxkamada , waa in maxkamada la soo wargaliyaa ayadoo la diiwaan galinayo codsi ah in qofkaasi jabiyaya ama yasay amarkii maxkamada.

Dacwada ku saabsan jabinta ama yasida amarka maxkamada waxaa diiwaan gelin kara waalidka, ilmaha ama qofka/hay,ada ilmaha ka masuulka ah. Hadii maxkamadu hesho in maxkamad amarkeed la jabiyey markay qabato dhageysiga dacwadaa,
Maxkamada waxaa laga yaabaa inay soo rogto ciqaab kulul, sida qoraal daraasadeed, saacado bulshada loo shaqeeyo, badalka xiritaan lagu xiro meel la

ilaalinayo (sida la shaqyan koox shaqo, ama qalab elektroonik ah oo lugta looga xiro guriga lagu ilaaliyo, xirid lagu xiro todoba maalmood xabsiga caruurta ama ganaax ilaa $100 doolar ah ama ciqaabahaas oo sidii la doono la isugu daray.
.

Ha dhowrin balan maxkamadeed oo loo dhigay in dib loogu eego dacwada si aad u soo sheegto jabin la jabiyey ama yasid la yasay amarada maxkamada. Waa lagama maarmaan in balan lala dhigto qofkii dacwada gacanta ku hayay si loo diiwaan geliyo in amarkii maxkamada la jabiyey ama la yasay.

Maxaanu samaynaa haddii xaalkayagu degdeg yahay/ dhibaato oo aanaan sugi Karin balan maxkamadeed?

Wixii ku saabsan Khatar soo foodleh la xariir "911"

Wixii ku saabsan dhibaato la xariir: Khadka taleefoonka ee degmada Kiinkoownti ee lala xariiro marka dhib jirto, kaasoo loo yaqaan 1-866-4CRISIS oo shaqeeya 24ka saac.